**GO'AANKA ANSIXINTA DIIDMADA AH EE LA XIDHIIDHA ADEEGGA DP WORLD BERBERA U QABATO SHIRKADAHA WADANIGA AH, SIDA NFMC IYO OOMAR INTERNATIONAL COMPANY.**

***KADDIB MARKUU DARSAY:-*** Dabciga sharci iyo xaqiiqada aasaaska khilaafka u dhexeeya shirkadda **NFMC** iyo **DP World** iyo marxalidihii uu soo maray.

***KADDIB MARKUU U-KUURGALAY:-*** Nuxurka cabashada shirkadda **NFMC** iyo qodobbada gun-dhigga u ah khilaafka.

***KADDIB MARKUU DHAGAYSTAY:-*** Warbixinta Guddida Gaarka ah isla markaana tix-raacay xogaha dheeraadka ah ee la xidhiidha khilaafka, ee ay ka heshay dhammaan wasaaradaha iyo hay'adaha doorka ku leh nuxurka khilaafka ama xog-ogaalka u ah, waxaanu kulamo kala duwan oo mid walba gaar u ah la yeeshay hay'adahan.

1. **Rugta Ganacsiga iyo Wershadaha.**
2. **Wasiirka W. H. Maaliyadda.**
3. **Wasiirka W.Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska, horena u ahaa Maareeyihii Dekedda Bebera.**
4. **Garyaqaanka Guud Ee Dawladda.**
5. **Guddida Agaasinka Dekedda iyo Aagga Ganacsi Ee Cashuuraha Ka Caaggan (Port and Free Economic Zone BoD).**
6. **Iyo Maareeyaha Hay'adda Dekedaha.**

***KADDIB MARKUU ARKAY:-*** In ay lagama maarmaan tahay xog rasmi ah laga helo hannaanka rogista badeecadda qamaddida ee shirkadda **NFMC** iyo doorka **DP World Berbera** ku leedahay, waxa guddida goluhu u xil-saaray waxay kormeer xog-ogaal noqosho ah ku tagtay Magaalada Berbera taariikhdu markii ay

ahayd **23/09/2023** isla markaana si toos ah u soo arkay hawsha rogista oo socota.

***KADDIB MARKUU QIIMEEYAY:-*** Isla markaana u kuur-galay hab-raacyada la xidhiidha tacrifadaha isla markaana lagu faahfaahiyay qodobka 12aad ee Heshiiska DP WORLD Iyo Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland iyo qodobka **15.2** oo tilmaamaya hannaanka xallinta khilaafka iyo jidka loo marayo haddii uu soo baxo khilaaf u dheexeeya labadooda iyo dhinac saddexaad oo ka mid ah daneeyayaasha (Oo Aan Ahayn Dawladda iyo Dp World Berbera) ee ku faahfaahsan Heshiiska.

***KADDIB MARKUU KU QANCAY:-*** Dhamaan xogaha ay heshay guddidu iyo doodda dhinacyada khilaafka.

**WUXUU U CODEEYAY**

Fadhigii **18[aad]** ee kal-fadhigii **7aad** oo ku taariikhsan **03/03/2024** oo ay fadhiyeen **63** Mudane, waxaana ansixiyay **40** Mudane halka **8** mudanena ka diideen **14** kalena ka aamuseen isla mrkaaana guddoomiuhu ma codayn, wuxuuna soo saaray go'aankan oo u faahfaahsan sidan:-

**GO'AANKA GOLAHA**

1. Guluhu wuxuu ayidayaa go'aanka la xidhiidha khilaafka Shirkadda NFMC iyo Shirkadda DP World Berbera ee ay hore u soosaareen guddiyada kale duwan ee madaxweynuhu u xil-saaray.
2. Guluhu wuxuu caddaynayaa in geelluhu xaq u leeyahay oo kaliya shaqada uu u qabto Shirkadda DP WORLD Berbera si waafaqsan qodobka 20aad, faqradda 3aad ee dastuurka oo u dhigan sidan, ***(Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin mushahar u dhigma hawsha ay qabtaan),*** taas oo ka dhigan in aanay jirin mushqaayad ku waajibisay loo shaqeeye aan shaqo loo qaban, waxaa kale oo iyana aan sharci ahaan bannaanayn in lagu qasbo loo shaqeeyaha mushaqaayad ka badan shaqada loo qabtay.
3. Goluhu wuxuu caddaynayaa inaan xaq loogu lahayn Shirkadda NFMC in laga qaado khidmadda xammaalka (Porterage Charges), maaddaama aanu xamaalku shaqo raris ah u qaban shirkadda.

4. In Shirkadda DP WORLD Berbera u magdhawdo isla markaana u celiso lacagihii xamaalka ee hore looga qaaday Shirkadda NFMC iyo kuwa dawladdu ka bixisay khasnaddeeda oo dhammaystiran.
5. Inay geelluhu xaq u leeyihiin oo kali ah khidmad xammaal oo u dhiganta shaqada ay qabteen oo ah qamaddiga ay ka uruyeen barxadda dekedda isla markaana ku cabbeeyeen jawaannada oo noqonaysa xaddiiga (miisanka) ay ururiyeen oo lagu dhuftay tacriifta geellaha ($3,5 halkii tan).
6. Goluhu waxa kale oo uu soo jeedinayaa in shirkadda DP WORLD Berbera ay ku dhaqanto heshiiska u dhexeeya dawladda iyo iyaga, gaar ahaan qodobka **12aad** oo khuseeya tacrifadda siisona tafsiir dhammaystiran sidiisan u fuliso, kaas oo u dhigan in lagu jaan-gooyo tacriifadda adeeg u dhigma shaqada macmiilka loo qabtay.
7. Goluhu wuxuu soo jeedinayaa Shirkadda DPW Berbera, inay si hagar la'aan ah u fuliso go'aamada hore iyo kuwa golahaba ee kor ku tilmaaman;, haddii aanay ku qancinnna, waxaa u bannaan inay oggolaato oo ku garnaqsato Maxakamadda Caalamiga ah Ee London Court of Arbitration ee ay shirkadda NFMC geysatay dawcadda iyaga oo ka duulaya qodobka **28aad** faqardihiisa koowaad iyo labaad ee dastuurka oo lala akhrinayo heshiiska qodobkiisa **15.2** muddo **30 maalmood** gudahood ah, isla markaana soo ogolaato soona saxeexdo yeedhista ka timid garyaqaannada NFMC ee uu hore Garyaqaanka Guud ugu gudbiyay maamulka DP WORLD Berbera, haddii ay diiddo in ay ka qayb qasho dacwaddaasi waxaa dacwooduhu xaq sharci u yeelanayaa in uu dacwad ka furto maxkamadaha dalka.
8. Goluhu wuxuu xaqiijinaynaa in ay DP World Berbera waajib ku tahay inay aqbasho gar-qaadista marka ay cidi dacwayso si waafaqsan heshiiska ay la gashay Somaliland qodobkiisa **15.2 (Concession Agreement)** isla markaana aanay iska diidi Karin dacwadaha lagu soo oogay, Sidoo kale heshiiska ay DP World Berbera la gashay Somaliland ma siinayo xasaanad aan lagu eedayn Karin ama golayaasha baarlamaanka looga yeedhi karin, sababta oo ah shirkadda DP World Berbera waa shirkad leh shaqsiyad qaanuuni ah oo ay waxna ku dacwayn karto laguna dacwayno karo sida waafaqsan qodobka **28aad** Ee Dastuurka.
9. Gebagabadii, Goluhu wuxuu farayaa Guddida Cadaaladda, Shuruucda iyo Dastuurka in ay hubiyaan dhaqan-gelinta go'aammadan isla markaana warbixin ka soo siiyaan Golaha mar kasta oo ay habboonaato.

**ALLA MAHAD LEH**

**Xog-hayaha Guud Ee Golaha Wakiillada JSL**
**Md. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle**

**Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Ee G, ahna Ku-simaha Gu. Golaha Golaha Wakiillada JSL**
**Md. Siciid Mire Faarax (Giirre)**

GOLAHA WAKIILLADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND